



Tix: XW/10/2018

Tar: 028/09/2018

WARSAXAAFADED .

INNAA LILLAAH WA INNAA ILAYHI RAAJICUUN **إِنَّا لِلَّهِ وَإِنَّا إِلَيْهِ رَاجِعُونَ**

Xisbiga Wadajir wuxuu tacsii u dirayaa eheladii iyo asxaabtii ay ka geeriyooden muwaadiniintii Soomaaliyeed ee ay maanta argagaxisadu ku beegsatay degmada Howlwadaag ee Magaalada Muqdisho. Waxaan alle uga baryaynaa in uu danbi dhaaf iyo naxariistiisa huwiyo intii ku dhimata, sabar iyo iimaana ka siiyo eheladii, asxaabtii iyo qaraabadii ay ka baxeen. Sidoo kale waxaan Ilaaheey uga baryaynaa in uu caafimaad iyo sookabasho siiyo intii weerarka ku dhaawacantay. ..

Beegsiga arday dugsi quraan dhigaanysa waxay muujinaysaa arxan la'aanta iyo damiir xumida kuwa weerarka soo qaaday. Caqli gal maaha in gumaadka shacabka guul lagu gaaro.

Xisbigu wuxuu aad uga walwalsanyahay dayaca dhinac aminga iyadoo ay argagaxisadu si xoriyad leh deegaano badan oo Caasimada ka mid ah uga hawlgalaan, wuxuu kaloo Xisbigu walaac qabaa dib u soo noqoshada isbaarooyinkii dadka lacagta lagaga qaadi jiray taasoo niyad jab ku ridaysa Shacabka, keeni kartana in ay argagaxisada u nuglaadaan.

Xisbigu wuxuu ugu baaqayaa Xukuumada in ay xil iska saarto mudnaantana siiso amniga iyo ilaalinta nabadgelyada Shacabka. Shacabka Soomaaliyedna waa in ay meel uga soo wada jeestaan argagaxisada iyo kuwa ka soo horjeeda jiritaankooda ummadnimo.

Xafiiska Warbaahinta ee Xisbiga Wadajir

Mogadishu, Somalia

2 September 2018